

# Xaqiiji iney ilmahaagu sii ceymismaan!

## Waxaa soo socda cusbooneysiinada Medicaid.

**Fiiro Gaar ah Waalidiin!** Miyaa ilmahaada lagu ceymiyaa iyadoo loo maraayo Medicaid gudaha Nebraska? Isbeddello ayaa ku imaanaya Medicaid. Waa muhiim in la ogaado sida isbeddelladani u saameyn karaan ceymiskaaga Medicaid ee kuwa aad ugu jeceshahay. Haddii adiga ama ilmahaaga aad hadda ka diiwaangashan tahay ama ay ka diiwaangashan yihiin Medicaid, waa muhiim inaad ogaato inaad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso caymiskaaga/kiina. Habka dib u cusboonaysiinta waa mid sahlan waxaana lagu dhamayn karaa habka onlaynka, boostada, ama telefoon ahaan.



### **Tallaabada 1: Cusbooneysii macluumaadkaada xidhiidhka.**

Xaqiiji in Nebraska Medicaid ay haysato macluumaadkaaga xidhiidhka ee ugu dambeeyay. Tan waxaa ka mid ah cinwaankaaga boostada, iimaylkaaga, iyo lambarkaaga taleefonka.



### **Tallaabada 2: Eeg boostadaada marar badan.**

Waxaa laga yaabaa inaad hesho warqad daabacan oo sharxaysa u qalmidaada ama u qalmida ubadkaaga ee Medicaid. Warqadan ayaa kuu sheegi doonta sida aad u cusboonaysiin doonto caymiskaaga.



### **Tallaabada 3: Ku buuxi foomkaaga cusbooneysiinta taariikhda kama danbeysta ah**

Haddii adiga ama ilmahaaga aad weli u sii qalantaan, buuxi foomka cusboonaysiinta oo ku soo celi ciwaanka lagu siiyo ee Nebraska Medicaid. Waxaa jirta taariikh kama danbeys ah iyo waqti cayiman oo foomkan loo baahan yahay in la soo buuxiyo.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa [www.accessnebraska.ne.gov](http://www.accessnebraska.ne.gov) si aad u gasho koontadaada oona ugu cusboonaysiiso caymiskaaga onlayn ahaan. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso macluumaadkaaga wax iska beddelay ee ku saabsan dakhligaaga, tirada goyska, iyo tafaasiisha kale ee shakhsi ahaaneed.



**La xidhiidh Hage maanta si aad u hesho caawinaad bilaash ah**  
[www.howtogetcare.org](http://www.howtogetcare.org)